

# Waxbarashada dugsiga sare ee dadka waaweyn (VOV)



**IMDi**  
Integrerings- og  
mangfoldsdirektoratet



Direktoratet for  
høyere utdanning  
og kompetanse

Ma ogtahay inaad qaadan karto waxbarashada dugsiga sare ee dadka waaweyn (VOV) inta aad ku jirto barnaamijka isbarashada (introduksjonsprogrammet)? Adiga oo u maraaya waxbarashada dadka waaweyn(VOV), waxaad yeelan kartaa xirfad aad ku heleyso shahaado xirfadeed (fagbrev). Shirkado badan oo ka furan Norway waxay u baahan yihiin shaqaale haysta shahaado xirfadeed. Qaadashada waxbarasho dugsiga sare ah waxay kuu sahlaysaa helitaanka shaqo.

## Maxaan ugalayaa VOV?

**Fursado shaqo oo badan** – Dhamayta waxbarashada dugsiga sare fursad weyn bay kuu siinaysaa shaqo ka mushahar sareeya leh.

**Lacag la'aan iyo kuguna haboon** – Waxbarashadu waa lacag la'aan, waxaadna ku dari karaa shaqo ama nolosha qoyska.

**Mustaqbal sugaran** – Kadib waxbarashada waxaad leedahay aqoon aad u isticmaasho shaqo raadinta ama aad ku gasho waxbarasho sare.

## Waa kuwee Fursada aad leedahay?

- Baro xirfad oo hel shahaado xirfadeed (fagbrev)
- Ku dar waxbarashada iskuulka, shaqo ama shaqo-tababar ah(praksis)
- Hel waxbarasho kugu habboon

## Yaa ka qayb geli kara?

Waad ka qayb geli kartaa hadaad

- Dhammaysatay waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ama wax u dhigma.
- Dhammaysatay waxbarashada dugsiga sare ee waddan kale, lakiin aan la aqoonsan

## Sidaan ku biloow

1. Kala hadal la-taliyahaaga barnaamijkan fursadaha jira.
2. Hubi bogga internetka ee guddiga gobolkaaga macluumaaadka dheraadka ah kuna saabsan waxbarashada la heli karo iyo xilliga uu ku eg yihiin codsiyadu.
3. Ka raadso meel(boos) [www.vigo.no](http://www.vigo.no) – inta aad ku jirto barnaamijka isbarashada.

## Wax su'aalo ah ma qabtaa?

La xiriir Guddiga gobolka(fylkeskommunen) wixii macluumaaad dheeri ah iyo hagid. La-taliyahaaga barnaamijkan ayaa kaa caawin kara arrintan.